**Warqada Siyaasadda Taleefoonka Gacanta ee ku socota Qoysaska CCS**
**8/21/25**
**FINAL**

Qoysaska Qaaliga ah ee Dugsiga Magaalada Columbus,

Marka aan bilaabeyno sanad-dugsiyeedkan cusub, waxaan jeclaan lahayn inaan idinla wadaagno wararka muhiimka ah ee cusub ee ku saabsan adeegsiga taleefoonnada gacanta iyo qalabka elegtaroonigga ah ee ardayga inta lagu guda jiro maalinta dugsiga.

Guddoomiyaha gobolka Mike DeWine ayaa dhawaan saxiixay sharci xakamaynaya adeegsiga taleefoonnada gacanta iyo qalabka elegtaroonigga ah ee gaarka loo leeyahay inta lagu guda jiro maalinta dugsiga ee dhammaan dugsiyada dadweynaha Ohio. Cusboonaysiintani waxay daba socotaa ansixinta **Aqalka Ohio ee sharciga 96 (Ohio House Bill 96).**

Cilmi-baadhistu waxay muujinaysaa marka ardayda laga gooyo taleefoonnadooda gacanta inta lagu guda jiro maalinta dugsiga, waxay noqdaan kuwo aad u fir-fircoonaada, oo ka shaqeeya tacliin heer sare ah, oo ay horumariyaan xiriiro xoogan oo ay la yeeshaan macalimiintooda iyo asaagooda. Hadafkeenu maaha inaan ciqaabno, laakiin waa inaan abuurno deegaan waxbarasho oo arday kastaa si buuxda uga qayb-qaato isla markaana ka madax bannaan-car-qaladaynta dugsiyada.

**Maxay tani uga dhigan tahay ardaydeena dugsiga dhexe iyo sare:**

- Taleefoonnada gacanta iyo qalabka kale ee elektiroonigga ah, oo ay ku jiraan saacadaha casriga ah (smartwatches) iyo cod-gudbiyaha dhagaha (earbuds-ka), lama ogola saacadaha waxbarashada. Siyaasaddan cusub waxay dhaqan geli doontaa bilowga sannad-dugsiyeedka hadda socda.
- Qalabka isgaarsiinta elegtaroonigga ah waa in codka laga xiraa mar walba ama laga dhigaa mid gariir ah inta lagu guda jiro maalinta waxbarashada, hadday tahay dhismaha dugsiga ama dhulka dugsiga, haddii aan loo adeegsan ujeeddooyin waxbarasho oo uu ogolaaday macallin ama maamule.

**Maxay tani uga dhigan tahay ardaydeena dugsiga hoose:**

Adeegsiga taleefoonka gacanta waligiis looma ogolayn inta lagu guda jiro maalinta dugsiga ee gudaha dhismayaasha dugsiga hoose. Waxaan fahansanahay in qoysasku ay ku tiirsan yihiin inay awood u yeeshaan inay carruurtooda la xiriiraan. Fadlan ogow in xafiisyada dugsigeenu ay diyaar yihiin inta lagu guda jiro maalinta oo dhan haddii aad u baahato inaad la xiriirto ardaygaaga.

**Ardayda waxaa loo ogol yahay inay adeegsadaan taleefoonka gacanta xaaladahan oo keliya:**

- Marka adeegsiga sida noocaas ah lagu diiwaan-geliyo ardayga Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah (IEP) ee hoos timaada Cutubka 3323 ee Xeerka Ohio ee Dib-loo eegay (under Chapter 3323 of the Ohio Revised Code) ama qorshaha lagu sameeyay sida hoos timaada Qaybta 504 ee Xeerka Baxnaaninta ee 1973 (29 U.S.C. 794) (in a plan developed under Section 504 of the Rehabilitation Act of 1973 (29 U.S.C. 794).). Fadlan la tasho Iskuduwaha Waxbarashada Gaarka ah ee ilmahaaga haddii aad wax su'aalo ah qabtid ama aad u baahan tahay caawimaad ku saabsan IEP/504-ka ee la xiriirta ka dhaafitaannada (related exceptions).
- Si loola socdo ama looga hadlo walaaca caafimaadka ee wata warqado caafimaad
- Marka ay jirto dhacdo khatar muuqata ama xaalad deg-degg.

**Sida aan si wadajir ah u wada taageeri doono arrintan:**

Waxaan aqoonsannahay in tani ay tahay nidaam cusub, waxaana halkaan u joognaa inaan idinku taageerno adiga iyo ardaygaaga sidii aad u samayn lahaydeen isbeddelkan sida ugu fudud ee suurtogalka ah. Hogaamiyayaasha dugsigu waxay wadaagi doonaan faahfaahinta gaarka ah ee dhismaha, waxaadna arki doontaa xusuusin, sida boorar iyo agabyo, sanadka oo dhan ah si loo xoojiyo fariintan.

Waxaan qiimeyneynaa iskaashigaaga waxaanan kugu dhiirigelineynaa inaad kala hadasho isbeddelka siyaasadeed ardaygaaga, adiga oo u-sharraxaya sida uu u taageerto waxbarashadooda iyo horumarkooda waxbarasho.

Dugsiyada Magaalada Columbus, waxaa naga go'an inaan hubinno in ilmo kasta uu dareemo in la taageeray oo la qiimeeyay. Habkan cusub ee lagu yareynayo adeegsiga taleefoonnada gacanta ayaa ah mid kale oo aan si wadajir ah ula shaqeyneyno adiga iyo macalimiinteena, si aan u abuurno dugsiyo bad-qab leh, soo dhaweyn leh, isla markaana ka madax bannaan-car-qaladaynta dugsiyada.

Anagoo iskaashanayna,

Dr. Angela Chapman

Dr. Angela Chapman
Superintendent/CEO, Columbus City Schools

Kormeeraha Guud/Maamulaha Fulinta, Dugsiyada Magaalada Columbus